

## Koobista mashruuca RIB

Koobistan waxa loo tarjumay tiro ah afaf kala duwan. Inta kale ee rugta shabakadda ama rugta internetka lama tarjumin sababta oo ah haddii aad doonaysid in aad ganacsi guul leh ka hirgalisid gudaha Boqortooyada Midowday (UK) waxa lagama-maarmaan ah aqoon fiican oo loo leeyahay Ingiriisiga.

### **Maxaa keenay 'Refugees into business' (qaxootiga oo gala ganacsiga)?**

Lix jeer ayay qaxootigu kaga badan yihiin shaqo la'aanta dadka aan qaxooti ahayn. Taasi waa khasaare weyn oo ku dhaca farsamooyinkooda iyo aqoontooda. Hal hab oo ay ku hormari karaan waxa weeye iyada oo laga fikiro inay furtaan ganacsi ama mashruuc bulsho.

### **Fiicnaan lahaydaa haddii ay sidaa u sahlan tahay!**

Sida kooxo kale oo badan oo sabool ah, waxa qaxootiga furanaya ganacsi soo foomsara tiro ah caqabado. Waxa caqabadaha ku jira shahaadooyinkooda oo aan la ictiraafin, dhibka helista dhaqaale, afka, helista war, takooris, maamul ka-cabsi iyo aqoon la'aanta xagga dhaqanka ganacsiga Biriitishka.

Hay'adaha Beesha ee Qaxootigu ma laha farsamooyinka lagama-maarmaanka u ah bixinta xiitaa talo ganacsi oo aasaasi ah isla markaana la-taliyeyaasha dadweynaha ee caadiga ahi si ku filan uguma warqabaan caqabadaha iyo sida loo bixiyo taageero haboon.

**Refugees into business** waxa loo aasaasay si wax looga qabto qaar ka mid ah dhibaatooyinka. Ulajeedadeeda ugu muhiimsani waa:

***In hagaajin mudo dheer ah lagu sameeyo taageerada loo heli karo qaxootiga raba inay furtaan ganacsi***

### **Rugta internetka ee refugees into business**

Rugtan internetku waxay isu keentaa war ku saabsan mashruuca oo ay ku jirto talo, daraasaad kiisas, tilmaan-bixin, iyo xidhmooyin war farsamo iyo alaab tababar.

### **Tilmaan-bixinnada iskaa is-gargaarka ah ee ku saabsan bilaabista ganacsi**

Waxay kuwaasi awood kuu siin doonaan in aad go'aan ka gaadhid in haynta ganacsi kugu haboon tahay iyo in kale kaana gargaari doonaan bilaabista ganacsigaaga.

### **Xidhmo ah war farsamo oo loogu talagalay la-taliyeyaasha ganacsiga ee dadweynaha caadiga ah**

Waxa xidhmadan ku jira warka aasaaska u ah arrimaha qaxootiga iyo waxyaabaha la rabo in la-taliyaha ganacsigu yaqaano marka uu qof qaxooti ah ka gargaarayo furista ganacsi.

### **Xidhmo ah war farsamo oo loogu talagalay hay'adaha qaxootiga**

Waxa xidhmadan ku jira la-talinta ganacsi ee aasaasiga ah iyo gargaar ah helista iyo la-shaqeynta la-taliyeyaasha ganacsi ee u adeegga dadweynaha caadiga ah.

**Koorasyada tababarka**

Mashruucani waxa uu tijaabiyay koorasyo tababar oo ku saabsan talada ganacsiga ee aasaasiga ah, wargalinta qaxootiga iyo warka bilaabista ganacsi oo loogu talagalay ganacsi bilaabeyaasha qaxootiga ah.

Waxa aanu rajeynayaa in rugtan internetku kuu noqoto mid faa'iido kuu leh. Fadlan nala soo socodsii wixii ah warcelin.